




Kaydso tamarta

*– Oo isku fillaysii
qasnadda qoyska*

Tilmaamo tamar kaydsi oo wanaagsan o

Qolka xamaamka/wax dhaqid

- » Qubayso halkii aad kaga dabbalan lahayd darka. Iska xidhi tuushka marka aad saabuunta marsanayso.
- » Wakhtiga maydhashada oo aad ka soo gaabisaa min 10 daqiqo ilaa 5 daqiqo waxa ay nus ka dhigaysaa isticmaalidda tamarta iyo biyaha.
- » U dayactir ama u bedel sida ugu dhakhsaha badan qasabadaha tifiqlaynaya iyo musqulaha da aya.
- » Yaanay biyuhu iska socon marka aad cadaya-nayso – oo kaydi darka muggii oo biyo ah wii-gii.
- » Ku maydh qaasaladda oo buuxda, waxaan nad isticmaashaa heer kulka ugu hoo-seeya ee habboon.
- » Wadh dharka aad qallaji-nayso halkii aad ku qal-lajin lahayd mashiinka, inta ugu badan ee suurtagalka ah.
- » Istic-maal mar walba barnaamijka bee-khaaminta marka aad dharka




Jikada

- » Qaboojisadu waxay ku taagnaanaysaa heer kulka +5°C, tallaajadduna -18°C.
- » Barafka ka gur qaboojisada iyo tallaajadda ugu yaraan hal mar sanadkiiba.
- » U nadiifi oo u huufari si joogto ah xagga dambe ee qaboojisada iyo tallaajadda.
- » Iskeed u dhalaali cuntada ku barafowday qaboojiyaha, halkii aad ka isticmaali lahayd biyo kulul ama mikrada.

- » Cuntada kulul qabooji ilaa ay la mid noqonayso heer kulka qolka inta aanad gelin qaboojisada iyo tallaajadda.
- » Weligaa ha isticmaalin digsi ka yar saxanka dabka, mar walbana dabool isticmaal.
- » Sida ugu tamar – kaydinta badan ee biyaha loo kulu-leeyaa waa in aad ku diiriso biyo – kariye ama mikrada.
- » Isticmaal foorno wax ku dubidda isla marka aad cuntada karinayso.

o beekhaaminaya lacagta iyo deegaanka



- » Xidh foornada haddii ay madhantahay wax ka badan 30 daqiqo.
- » Weelka ku dhaq – dhaq tashti ama meel godan oo leh fur.
- » Ku maydh mishiinka weelka oo buuxa. Isticmaal heer kul hoose, badiyaba waxa ay keenaysaa natiijo isku mid ah.

Qolka fadhiga/qolka hurdada

- » Isticmaal nalalka tamarta beekhaamiya ama nalalka "LED", marka aad qolka ka baxaysana sii demi. Iibsigooda ayaa qaali ah laakiin waxa aad kaga faa ii-daysaa isticmaalka tamarta oo yaraada!
- » U laydhi si wanaagsan adiga oo hawada u furaya wakhti kooban.
- » U isticmaal wakhtiyeyeye ifinta dhirta, quraaradda kalloonka iyo waxyaalahaa kale ee aan u baahnayn in ay daarnaa-daan 24ka saac.
 - » Heer kulka guriga ku hay 20°C, weliba qolka hurdadu ha ka hooseeyo. Haddii aad ka safryaso guriga waxaba ku filan 15°C.
- » Ku ururi dhammaan xidhiidhyada korontada, dab qaybiso leh mawjad – xidhe, markaa waxa aad ka baaqsanaysaa in xubinta iska taagnaantu (standby) ay koronto kaa xaddo.
- » Ka saar battari – cabbeeyaha iyo gudbiyeyaasha fiishta korontada, marka aan la isticmaalahayn.
- » U bedel bateriyada ku jira ciyaaraha carruurta kuwa la cabbayn karo.

Isticmaalka korontada

Qalab	Isticmaalka	qarashka sanadkii
Mishiinka weelka	1 mar/maalintii	613 kr
Mikrada	7 daqiq/maalintii	76 kr
Huufar	1 saac/wiigii	62 kr
Qaboojiye	24 saad/maalintii	200 kr
Tallaajad	24 saac/maalintii	465 kr
Bun-kariye	1 saax/maalintii	350 kr
Qasaalad	2 saac/maalintii	1 752 kr
Dhar qallajiye	1 saac/maalintii	876 kr
Kaawayid	1 saac/wiigii	62 kr
Timo-qallajiye	1 saac/wiigii	62 kr
Quraarad kalluun	24 saac/maalintii	631 kr
TV (plasma/LCD)	3 saac/maalintii	329 kr
TV (dhuunta-sawirka)	3 saac/maalintii	184 kr
10 laambado if badan	5 saac/maalintii	1 314 kr
10 laambado tamar yar	5 saac/maalintii	241 kr

(Qiimaha korontada ee la xisaabiyeey oo khidmadaha oo



Isku fillaysii qasnadda qoyska

Qof waliba wuxu rabaa lacag badan oo jeebka ugu hadha. Hab wanaagsani waa inaad kaydsato tamarta nololmaalmeedka gurigaaga. Boqolaal lacag ah oo dheeraad ah ayey kuu kaydinaysaa. Isla markaas aad isku fillaysiinayso qasnaddii qoyska, waxa aad taageeraysaa deegaan fiican oo ay ka helaan facyasha soo socdaa in ay ku noolaadaan bulsho wakhti dheer sii waarta.

Wakaaladda tamarta, xafiiska tamarta ee Sydost, degmooyinka, shirkadaha guryaha iyo ururo, waxa ay si wada jir ah isugu dubba rideen warbixinta qoraalkan oo koobaysa taloooyinka tamar kaydsiga ee ugu waanaagsan.

Si ay dadka ugu badan ee suurtagalaka ahi u helaan warbixintan waxa qoraalka loo turjumay ilaa afar iyo tobantaf oo kala duwan –af carabi, afka-boosniga, af ingiriisi, af faransiis, afka Finland, afka Kuruweeshiga, af kurdiga waqooyi, af Eeraani, af Turki, af Jarmal, afka Serbiga, af soomaali, af Isbaanish iyo af Soraani.

Si taxadar leh u akhri. Waxa ka faa iidaya dhaqaalahaaga iyo cimiladeena labadaba.

Ka akhri wax dheeraad ah oo ku saabsan tamarta iyo deegaanka:

- » www.energimyndigheten.se
- » www.energikontorsydost.se
- » www.blienergismart.se

Waxa nagala shaqeeyey:

